# Wixii warbixin dheeraad ah ee ka qeybqaatayaasha cilmi baarista

**Warbixinta ku saabsan sahanka FinMONIK**
Sahanka FinMONIK waxaa fulliyay Machadka Caafimaadka iyo Daryeelka Qaranka. 13,600 qofood dibada ku dhashay oo labadooda waalidba ay dibada ku dhasheen ayaa sidoo kale si wareegta ah loogu doortay sahanka. Warbixintaada waxaa lagala baxay Xarunta Diiwaanka Bulshada.

Sahanka wuxuu aruuriyaa warbixin lagu xisaabtamo ee ku saabsan fayo qabka iyo caafimaadka, kartida shaqeynta iyo kartida shaqada, adeega la isticmaalay oo lagala kulmay bulshada ajaanibka. Warbixinta waxaa sidoo kale laga qaaday wax ku saabsan shaqada iyo xadeynada suurtogalka ah ee lagu helayo shaqada sidoo kale sida waaya aragnimooyinka takoorida. Warbixintaan waxay sare u qaadeysaa kartida shaqeynta iyo kartida shaqada ee bulshaad ajaanibka sidoo kale sida hormarinta adeegyada caafimaadka iyo bulshada.

Daraasada waxaa maalgeliyay Wasiirka Arimaha Dhaqaalaha iyo Shaqada, degmooyinka iyo Magangalyada EU, Maalgelinta Muhaajirida iyo isdhaxgalka (AMIF). Warbixinta waxaa loogu baahanyahay sare u qaadida caafimaadka iyo daryeelka, hormarinta adeegyada iyo kormeerida isdhaxgalka. Natiijooyinka waxaa la daabacayaa 2019.

**Jawaabahaaga waa muhiim o waa qarsoodi**
Xogtaada waxaa looga baaran dagayaa si buuxdo iyo sida u hogaansan Xeerka Xogta Shaqsiga ee dhammaan heerarka nidaamka cilmi baarista. Ma jiraan sharaxaadyo gaar ah ee lagu daray cilmi baarista soo diraa oo lagu tirikoobaa, laakin kuwaan waxay istimaalaan lambarka cilmi baarista kala duwan. Aqoonsigaaga laguma aqoonsan karo si ku saleysan warbixinta la qaaday. Suurtogal ma ahan in la aqoonsado warbixinta lagu bixiyay jawaabgayaasha shaqsiga ama aqoonsiga qof kale ee ku saleysan natiijooyinka cilmi baarista. Cilmi baarayaasha waxay leeyihiin waajibaad sharci ah ee siideyn la'aanta. Xogta cilmi baarista asalka ah waxaa si toos ah loogu keydinayaa Machadka Caafimaadka iyo Daryeelka Qaranka. Siideynta joogtada ah ee warbixinta laguma sameynayo si ku saleysan xogtaada iyo xogta marnaba laguma siideynayo meel ka baxsan EU ama EEA.

Waxaad sidoo kale ka laaban kartaa ka qeybqaadashadaada ee daraasada ee bar walba iyada la ogeysiinayocilmi baaraha masuulkka ah daraasada ama maamulaha cilmi baarista ee ku saabsan midaan. Warbixintooda xiriirka waxaa lagu daray warqadaan.

**Isugeynta diiwaanada xogta**
Oo ay la jirto ***ogolaanshahaaga***, xogta ka imaanaaneyso hayayaasha diiwaanada kala duwan waxa lagu dari karaa natiijooyinka daraasada: Machadka Caafimaadka iyo Daryeelka Qaranka (xogta ku saabsan daaweynta jirada, balamaha iyo nidaamyada), Machadka Caymiska Bulshada ee Finland (xogta ku saabsan faa'idooyinka la bixiyay iyo lacag celinada), Statistics Finland (xogta ku saabsan waxbarashada iyo fasaxyada, heerka dhaqaalaha iyo sababta dhimashada), Xarunta Finnish ee Howlgabyada (xogta howlgabyada, dhaqancelinta iyo xiriirada shaqada), Maamulka Xanshuurta (xogta canshuurta), Xarunta Diiwaanka Bulshada (magaca, xogta iyo goobta dhalashada, ciwaanka warbixinta, jinsiga, heerka guurka, afka hooyo, muwaadinnimada) iyo Sawaarada Arimaha Dhaqaalaha iyo Shaqada (xogta ku saabsan shaqada iyo qiyaasaha la xiriiro). Shati gooni ah ee hayaha diiwaan walba waxaa loo radiyay isu geynta xogta.

Diiwaanka xogta ku lifaaqan xogta cilmi baarista FinMONIK ee ay la jirto ogolaanshahaaga:

| Diiwaanka | Xogta |
|---|---|
| **THL** | Xogta ka timid Diiwaanka Ka saarida Isbitaalka/Diiwaanka Daryeelka ee Daryeelka Caafimaadka (HILMO, muddada 1994–2023), oo ay ku jiraan baaritaanada iyo qiyaasaha la qaaday, xogta ka timid Diiwaanka Booqashooyinka Daryeelka Caafimaadka (AvoHILMO, muddada 2011–2023), xogta kansarada la baaray ee Diiwaanka Kansarka Finnish (muddada 1953–2023), xogta ka timid Diiwaanka Baaritaanka Weyn (muddada 2004–2023 ee dumarka waxaa ku jiro tusaalaha FinMONIK), oo ay ku jiraan haddii qofka ka qeybqaatay baaritaanka kansarka, Diiwaanka Dhalashada Caafimaadka (muddada 1987–2023), oo ay ku jiraan sannooyinka dhalida iyo warbixinta la xiriirto kormeerida uurka, Diiwaanka Sameynta Ka soo xaaqa (muddada 1983–2023), oo ay ku jiraan haddii qofka uu sameeyay ka soo xaaq iyo jeermisdilida, sannooyin markii midaan la sameeyay, Diiwaanka Jeermisdilida (muddada 1987–2023). Xogta ka timid Diiwaanka Cudurada Caabuqa (muddada 1980–2023), oo ay ku jiraan HIV, cagaarshowga A, B, C, waraabowga, malaariyada iyo dacwadaha tiibishida, Xogta ka timid Diiwaanka Caainya Bulshada (muddada 2006–2023). |
| **Tilastokeskus (Tirikoobka Finland)** | Xogta waxbarashada, tababarka iyo fasaxa, heerka dhaqaalaha bulshada, sababaha dhimashada (muddada 2010-2023) |
| **KELA** | xogta caymiska, gunada curyaannimada, gunooyinka daryeelka ee maxaabuusta, xogta dhaqancelinta, xogta ka timid diiwaanka lacagcelinta ee qarashaadka daawada oo qiimo gaar ah, xogta ka imaatay diiwaanka qoraalka ee daawooyinka loo isticmaalay daaweynta cudurada raaga ee ugu caadisan, xogta ka imaaneyso Diiwaanka Gunada Jirada ee muddooyinka gunada jirada iyo sababtooda (muddada 2010–2023) |
| **VRK (Xarunta Diiwaanka Bulshada)** | Heerka guurka, taariiqda guurarka, dadka dagan ee kale ee hoyga, tirada guud ee dadka dagan ee hoyga, tirada dadka dagan ee aan qaangaarin ee dagan (muddada 10–2023). |
| **TEM (Wasaarada Arimaha Dhaqaalaha iyo Shaqada)** | Xogta shaqo la'aanta (furayaasha shaqada ee shaqo raadiyayaasha iyo isbadelada la xiriiro);<br>xogta la xiriirto shaqo raadiyayaasha (aasaaska warbixinta, waxbarashada, baaritaanada) iyo<br>xogta ee shaqada (tababarka shaqada, fasaxa ay raadiyeen shaqo raadiyayaasha,<br>Isku dayada shaqooyinka, qiimeynta jirdhisnaanta ee shaqada) iyo isbadelada la xiriiro. (muddada 2010–2023). |